Erayga iyo Maanta Somtwt 0243
Nolosha Cusub

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqashaan saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **Nolosha Cusub.**

Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Doug Schroder. Sii dhegayso barnaamijka saaxiib marka aynu mawduuca kore ee ku saabsan **Nolosha Cusub** ee aan halkan idiinku lafaguri doonno aad maqli doontaan. Balse intaynaan idiin billaabin aynu wada dhegaysanno qasiiddadan.

SOGN: Eebbe waa Raxiim

Qof kasta ee u yimaada Ciise Masiix waa in uu maraa waxa loo yaqaanno cusboonaysiin. Erayga cusboonaysiin waa eray cajiib ah wuxuuna ka macne yahay, **"Nolosha Cusub."** Waxay ka macne tahay bilow cusub. Waxaan ka akhrinaa Injiilka sida Yooxanaa u qoray cutubka 3aad in Ciise uu ka hadlay maaddada dhalashada labaad. Cusboonaysiinta ama bilowga cusub oo ah xagga ruuxa.

Wuxuu Ciise la hadlayey nin magaciisa la yiraahdo Nikodemos, wuxuuna ku yiri, sida ku qoran Injiilka sida Yooxanaa u qoray 3:3, **"Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Runtii, runtii waxaan kugu leeyahay, Qof haddaanu mar kale dhalan, boqortooyadii Ilaah arki kari maayo."** Ciise Masiix ayaa si tafaftiran arrinka ugu nuuxnuuxsaday ka gadaal markii Nikodemos uu su'aal ka keenay, wuxuuna Ciise yiri, sida ku qoran Injiilka sida Yooxanaa u qoray 3:5-6,

“Ciise baa ugu jawaabay, Runtii, runtii, waxaan kugu leeyahay, Qof haddaanu ka dhalan biyo iyo Ruuxa, boqortooyadii Ilaah geli kari maayo. Waxa jidhka ka dhashaa waa jidh, waxa Ruuxa ka dhashaana waa ruux.”

Markaasina, qof kasta ee doonaya inuu galo boqortooyada Ilaah, ama haddaan si la fahmi karo u dhigo, doonaya in boqortooyada Ilaah ee uu ku helay Ruuxa Qoduuska ah, oo doonaya inuu daa’iman Ilaah ula joogo, qofkaasu waa inuu mar kale dhashaa. Waxaa jira fahamdarro muuqata oo dadku ka haystaan xiriiirka aan Ilaah la yeelanayno marka la eego sida dadku ay aaminsan yihiin. Dad badan waxay la tahay inay Ilaah baadi goobaan markii ay da’ noqdaan.

Maxaa wacay haatan way caafimaad qabaan, oo xoog bay leeyihiin, waxna uma baahna. Laga yaabo inay weliba kalsooni weyn isku qabaan, oo waxay la tahay inay wakhti haystaan. Markiise ay tabar yareeyaan, caafimaadkuna xumaado, markaas ayey xiriirka Ilaah la yeelanayaan xoogga saarayaan. Waxaa jira dad ku sifeeya iimaanka sida inuu yahay wax la cuskado, oo lala soo boxo markii ay timaaddo tabardarro ama baahi.

Dadka toobadda raadiya markii ay da’ noqdaan ayaa waxay ku jiraan ciyaar, waxayna khatar gelinayaan mustaqabalka noloshooda daa’imka ah ee ay Ilaah la joogayaan, taasina waa nacasnimo daran. Waa nacasnimo intaad nolshaada oo dhan ku ciyaarto markaad dhallinyaro tahay, oo haddana aad istiraahdo markii tabari kaa daba timaaddo, aan Ilaah u jeesto. Waxay tani I xusuusinaysaa ragga qaar oo hablo badan la tunta, oo kol dambe ku baraaruga guur markii ay helaan gabadha ay doonayaan inay guursadaan.

Ragga caynkaas ah waxay ku macaasi iyo fawaaxisho wuxuuna ugu dambayn tilmaansanayaa gabadha uu rabo inta uu ku jiro macaasida. Markii uu helo tii uu rabay, ayaan idiin sheegayaa, inkastoo uu helay, inuusan u qalmin, waayo ninkanu wuxuu ku jiray nolol fawaaxisho ah oo sino badan. Isla sidaas oo kale qofka Ilaah u imanaya maahan inuu ku sii socdo nolosha dembiga leh iyo khiyaanada. Ilaah wuxuu inoogu yeeray nolosha cusub ee qoduuska ah ee laga helo Ciise Masiix.

Taasina waa waxa ay ka macne tahay nolshada labaad—toosoo la xirayo maamulkii hore ee nolsohaada dembiga leh si loo cusboonaysiiyo oo noloshaadu u yeelato bilow cusub. Taasina dhici mayso haddaynaan beddelin ficilkeenna. Maahan oo keliya inaad Ilaah rumaysan tahay oo aad uga mahadceliso hadiyadda nabaadiinada, oo haddana aad ku sii socoto noloshaadii dembiga lahayd. Taas la dooni maayo, waa in ficilkii hore la beddelaa, oo laga jawaabaa casumaadda Ilaah.

Iyadoo taas maanka lagu hayo, ayaa waxaa habboon inaan ka fakarno Injiilka sida Matayos u qoray cutubka 22aad. Waa masaalkii Ciise Masiix ee ku saabsanaa boqorkii dadka ku casumay xafladdii arooska. Qaar baa ka cudurtaartay, oo sheegay inaanay iman karin—mar kasta la waayi maayo dad ka mashquula casumaadaha loo fidiyo.”

Waxaa taa la mid ah kuwa lagu casumo inay xubin ka noqdaan boqortooyada Ilaah, iyo inay noloshooda beddelaan, oo quluubtoodana siiyaan Rabbiga. Adiga qudhaaduba waad heshay casumaaddaas oo kale. Miyaad ka jawaabtay? Miyaad qaabishay Sayid Ciise Masiix? Way ahmiyad ballaaran tahay inaad isbeddel samayso, iyo inaad ka jawaabtay casumaadda,

Oo aad wax walibana ficil ka dhigtay. Waxaa jira masaal kale oo ku qoran Injiilka sida Matayos u qoray cutubka 13aad, waana masaalka beerrayga, kaasoo u baxay inuu miraha abuuro, mirihii oo lagu daadiyey dhul kala geddisan, ayaa marxalado kala duwani ay ku dhacday. Bal aynu isla eegno haatan Injiilka sida Matayos u qoray 13:3-9, waxaana qoran sidatan:

"Markaasuu wax badan masaallo ugu sheegay isagoo leh, Beerrey baa baxay inuu wax beero, oo intuu beerayay qaar baa jidka geestiisa ku dhacay. Kolkaasaa shimbirro yimaadeen oo cuneen. Qaar kalena waxay ku dhaceen dhul dhagax ah oo aan carro badan lahayn; kolkiiba way soo baxeen, waayo, carradu hoos uma dheerayn, laakiin qorraxdu goortay soo baxday way gubteen, waana engegeen, waayo, xidid ma lahayn. Qaar kalena waxay ku dhaceen qodxan, qodxantiina waa soo baxday oo ceejisay. Qaar kalena dhul wanaagsan bay ku dhaceen oo ay midho dhaleen, mid boqol, midna lixdan, midna soddon. Kan dhego wax lagu maqlo lahu ha maqlo."

Wuxuu ku soo gunaanaday, kan dhego wax lagu maqla lahu, Ha maqlo. Waana arrin caalami ah in qofku haddii uu doonayo inuu wax barto, ay tahay inuu wax maqlo ama dhegaysto. Muxuu ahaa macaaniga ka dambeeya masaalkaas? Jawaabtu waa tah: "Miraha waa hadallada IIaah, waana boqortooyada Ciise Masiix, waana akhbaarka nabaadiinada ee Masiixa, iyo fursad loogu yimaado Rabbiga. Waa fursad aad leedahay in lagu cusboonaysiiyo ama aad mar kale dhalato, dadkuna siyaabo kala duwan ayey uga soo jawaabaan arrinkaas. Waxaa jira shakhsiyaad qalbigoodu qallafsan yahay, oo aan doonayn inay maqlaan Injiilka Masiixa.

Waxaa kaloo jira dad si farxad leh markiiba u qaata, laakiin aan go’aan adag lahayn. Woxoodu waa hadal, laakiin ficil ma leh, oo ma beddelaan noloshooda. Waxaa kaloo jira shakhsiyaad daacad ah, oo waxay qaabilaan ballammada Ilaah, saamaxaadiisa iyo nabaadiinadiisa, laakiin haddana waxay galaan arbushaad, oo dadka dunida ayaa dhiba, waxayna sidaas ku lumiyaan rumaysadkooda. Ugu dambayn waxaa jira shakhsiyaad aasaaskoodu dheer yahay oo rumaysadkooda Masiixuna uu xoog leeyahay.” Haddaan fasiraadda intaa ku simo, waa in haddaba tani ay innaga digiin noo ahaato, oo markii aan qaabilno Masiixa, oo u jeesanno, waa in daacadnimo isa soo taraysa la lahaado. Maahan oo kaliya xagga afka; maahan inaan ku soconno noloshii hore ee aan ku jirnay intaan Masiixa u imanin. Waa in aad noqoto mid leh bilow cusub, iyo qof leh cusboonaanta ruuxa.

Warqaddii loo qoray Cibraaniyada ayaa waxaa ku qoran digiintan leh, **“Maanta ha adkaynina qalbiyadiinna.”** Ahmiyaddu waxay tahay inaad qaabisho casumaadda lagu siiyey. Maahan inaad tiraahdo sanado ha lay sugo, si aan kaga fakaro arrimaha qaabilaadda khuseeya. Injiilka maanta ayuu kuu yimid, waxaana lagu weyddiisanayaa inaad qaabisho Ciise Masiix, iyo hadiyadda Ilaah ee nabaadiinada ee laguu keenay. Taasina waa sababtii Masiixu u yimid. Waana sababtii uu nafsaddiisa qurbaan ahaanta ugu dul bixiyey iskutallaabta, si ikhtiyaar ah ama furcaddi ah. Iskutallaabta ma ayan saarin dad kale, oo itaaldarro uu lahaana laguma geynin halkaas. Taasi waxay ahayd qorshada Ilaah ee nabaadiinada, Masiixuna isagoo raalli ah ayuu naftiisii bixiyey.

Wuxuu sameeyey waxa adigu aad maanta helayso. Waa inaad laba hal kala doorato-Waana inaad tiraahdo haa, waan rumaysanahay oo waxaan doonayaa in Ciise noqdo sayidkaaga, oo markii aad sidaas samayso, Ruuxa Qodduuska ah ayaa markiiba bilaabaya furashadaada, waxaana dib lagaaga soo iibsanayaa dembigaaga, waana lagu cusboonaysiinayaa. Waxaa lagu siinayaa nolol cusub, iyo bilow cusub adigoo Masiixa ku dhex jira. Waxaad kaloo dooran kartaa inaad noqoto mid qalafsan oo diida farriinta Injiilka. Dhibaataduna waxay tahay inaadan nolosha cusub helaynin Ciise Masiix la'aantiis. Geli maysid xafladda arooska adigoo aan wadan casumaadda boqorka. Welibana u hayaami maysid jannada, oo jebin maysid silsiladda dhimashada adiga kelidaa, waxaadse u baahan tahay caawimaadda Ilaah.

Haddaanay sidaa kula ahayn, waad is khiyaamaysaa, waxaana ku sugaya qabri. Waa inaad casumaadaas ka fakarto, mana ahan wax ciyaar ah, iyo madadaalada nolsoha. Waxaa kugu socda wakhti, waxaanad bilaabaysaa goor dambe—haatan maxaad ka yeelaysaa casumaadda lagu siiyey? Waa hagaag, waxaa habboon inaad timaaddo oo ka guddoonto hadiyadda Ilaah. Haddii waxa aad doonayso ay tahay bilow cusub, tuko oo Ilaah weyddiiso inuu dembiyadaada cafiyo. Waxaanad Masiixa weyddiisataa inuu soo dhex galo noloshaada iyo inuu ahaado bixiyahaaga, dabadeedna waxaad imaanaysaa heerka labaad oo loo yaqaanno daahirinta.

Erayga daarin wuxuu ka macne yahay qoduus-ka-dhigis. Ruuxa Qoduuska ah wuxuu doonayaa inaan korno oo aan noqonno sida kuwo la mid ah Ciise, markay joogto hadalkeenna iyo ficilkeenna.

Marka ay sidaas tahayna, kuwa aan ciyaarta u qaadan rumaysadkooda ee mar kale dhashay waxay doonayaan inay joogteeyaan waxbarashada Masiixa. Waxay dhegaystaan Hadallada Ilaah, waxayna ficil ka dhigaan waxa Ilaah faraayo. Ogow inaadan xaqiiqo ahaan helaynin wax cudur daar ah oo aad ku diiddo casumaadda. Waa inaad maantaba qalbigaaga furto, oo aad qaabisho Sayid Ciise, oo aad u timaaddo. Waa casumaadda Ilaah, oo Saidkuna mar waliba wuxuu diyaar u yahay inuu qaabilo dembiileyaasha. Isla sida dhakhtarka, wuxuu mar wlaiba diyaar u yahay inuu qaabilo bukaanka marka ay ka dhibaatoonayaan cudura u baahan in la daweeyo.

Waa wax aan suuragal ahayn in qof jiran ee qaba cudur uu u dhiman karo uu yiraahdo, dawo uma baahni. Dadku waxay qabaan cudur ruux ahaaneed oo loo yaqaanno dembi kaasoo u baahan in wax laga qabto, wuxuuna ku dawoobaa saamaxaadda Ciise Masiix. Nabaadiinada Ilaah, ayaad ku heli kartaa hubaasha ah in cudurkan dembiga wax laga qabto. Maxaa ku daahinaya haddaba? Kibirkaaga iyo qabkaaga oo keliya ayaa kaa hor taagan. Waxaan kuugu baqayaa inaad Ilaah hortii isku hoosaysiiso, qaabisho Masiixa oo aad qirato demigaaga. Taasi yarayn mayso dadnimadaada, wa amarkii aad qirato baahidaada. U imaaw Ciise Masiix, oo dhiiranow waayo wuxuu ku siinayaa nolosha cusub, iyo bilow cusub markaad isaga la joogto. Waxaad helaysaa saamaxaaddiisa oo ku siinaysa nolol aad isaga u noolaanayso.

SONG: Eebbe Waa Raxiib

Waxaa haddaba intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah aad ka maqli doontaan toddobaadka dambe saacaddii aan maanta soo galnay, isla idaacaddan. Waxaad waraaqaha noogu soo qortaa sanduuqa nambarkiisu yahay 21514, oo koodkun a yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad noogu sood iri kartaan 0707032060. Emailkayaga waa afarah@twr.co.ke. Waxaa kaloo aad isla barnaamijkan ka daalacan kartaa websitekayaga, waxaana weeye isna www.twr360.org. Farriinta waxaad ka soo hor-marinaysaan Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060.